

Somali version:

Gacsiye All City High Qooyaska iyo Shaqaalaha,

Waan ku faraxsanahay inaa idin ku soo dhaweeyo sanad dugsiyeedka cusub. Wadajir, dhamaanteena waxaa ka shaqeen doonaa abuurista jawi soo dhaween iyo hirgalin leh. Caruurtaada amaankooda ayaa ah ahmiyada ugu sareeso, waxaa rabaa inaa ku siiyo qaar ka mid ah macluumaadka ku saabsan nidaamka loo dajiyay dadka soo booqanaayo iskoolkeena. Waxay joogaan meel lagu ilaaliyo ardaydeena iyo shaqaalaha, dhamaan dadka soo booqanaayo waa inay u hagaansamaan sharciyadaan. Qof kasta oo raacin sharciyadaan maloo ogalaan doono iney soo galaan waqtiga ay soo booqdaan. Wax laga reebaayo majiro.

- Albaabka weyn ee laga galo iskoolka ayaa ahaan doono halka kaliya ee dadka soo booqanaayo ka soo gali doonaan. Waxaan jeclaan laheen inaa shaqsi ahaan kuu salaamno, marka dadka soo booqanaayo waa iney si toos ah ugu wargaliyaan iskoolka xafiiskiisa ayna soo bandhigaan sawir aqoonsi ah si ay u helaan kaarka booqashada.
- Waalidiinta/xanaaneeyaasha waa inay wacaan iskoolka xafiiskiisa haday rabaan inay wataan caruurtooda ka hor waqtiga caadiga ah, ama hadee dalbadaan lakulan kasto oo macalimiinta/shaqaalaha, waana iney soo bandhigaan sawir aqoonsi ah markay imaadaan.
- Sida amaanka borotokoolka, dadka soo booqanaayo waa la baaraa alaabtooda. Qof walba oo diido maloo ogalaan doono inoo joogo hantida Degmada.
- Qof kasta oo la weydiiyo inoo ka baxo iskoolka waa inoo si dagdag ah u sameeyaa. Intaas waxaa sii raacsan, hadaa dareemtid inaa la damaanad qaadin inaa ka baxdid, fadlan la xariir Madaxa Iskoolka. Si kastaba ha ahaatee, si loo ilaaliyo nabada, codsiga in laga baxo waa inaa la raaco si looga fogaado kala go'a jawiga soo saarida waxbarashada caruurtaada.

Anshaxa Sharciga Degmada waxoo quseeyaa dhamaan bulshada iskoolkeena, ka mid ah ardayda, shaqaalaha, qooyaska, iyo xubnaha bulshada. Hadaa dareemtid xaquuqdaada, ku saabsan Anshaxa sharciga, in lagu xadgudbay dhinac kastaba, fadlan la xariir Iskoolkaaga Xariirka Waalidka ama Iskoolka Kalkaaliyaha Guriga.

Rabitaankeena ugu weyn waxaa waaye inaa abuurno jawi soo dhaween iyo hirgalin leh. Dabeecadaha aan taageerin jawi soo dhaween iyo hirgalin leh wax ayaa laga qabandoonaa si dhaqsi ah si loo dhiso xiriir wanaagsan loona sii wado jawi waxbarasho oo waxtar leh.

Qof kasta woxoo door ku leeyahay nabadgalyada iyo amaanka bulshada iskoolkeena. Waxaan kaa dalbanaynaa inaad feejignaatid oo aad soo sheegtid dhaqdhaqaaqyada laga shakiyo iskoolka ama agagaarkiisa isla markiiba adigoo wacaayo 585-262-8600.

Mahadsanid,

Armando Ramirez
All City High Principal